
DHIBIC JACAYL
Nasiibkayga ayaa xumaaday.
Maxamed Cilmi Maamuus

Magaca qoraaga : Maxamed cilmi  Maamuus.
Taariikhda dhalashada : 12/8/1997.
Goobta dhalashada : Hargaysa .
Taleefanka : 063- 4126942.
Email : aftahan1433@gmail.com
Magaca sheekada : Dhibic jacayl.

Ujeedo: caddayn .

Anigoo ah maxamed cilmi maamuus waxa aan halkan ku cadaynayaa in aan ahay qoraaga

rasmiga ah ee sheekada magaceedu yahay dhibic jacayl isla markaasna aan ugu talo galay in aan kaga qayb galo tartanka sheeko iyo shaahid , sidoo kale waxa aan halkan ka cadaynayaa in aan akhriyay dhamaan shuruudaha tartanka kuna qancay dhamaan dhinac kastaba.

ALLAA MAHAD LEH .

SAXEEXA :



# DHIBIC JACAYL (Sheeko).

## Qaybta 1aad

Ugu horrayn aan iskiin baro , hooyo waa hooyaday macaane waxay ii bixisay guuleed aabona waa uu iigu wanqalay isna magacaas . waa isla bishii aan bartay qofkii u horeeyay

noloshayda ee aad saamaynta ugu yeeshay. bisha keli ah ee aan soddonka ku dhamaan ee sanadka miilaadiga ah .

waa february bisha lagu magacaabo waa bisha keliya ee aan is idhaahdo raxmad gaar ah ayay aniga ii siddaa .waa habeenimo khamiis ah , waxaan si degan u fadhiyaa qolkayga anigoo ku madadaalanaya barta ay baraha bulshada dhalinyaradu kuwada xidhiidhaan ee facebook.

dhego gashi ama waxa aad u taqaanaan earphone ka ayaa labada dhegood iigu jira iiguna xidhiidhsan taleefankayga gacanta ee aanu wakhtiyada firaaqada ah aanu saaxiibbo mudo isyaqaanay oo kale u macaamilno. waa taleefan caqiiba leh oo sababi doona waxa aan riyo mooyee run laygu tusi jirin, dhowaan ayaa hadiyad ahaan laygu keenay . waxa cod dahabi ah oo debecsan igusoo gaadhaya codka iyo laxanka isku ladhan ee sida geed ubaxyo leh oo kale ay laydhu u ciyaar siinayso isula jaanqaadaya , codkii alle ha u raxmadee muuse ismaacill qalinle oo marinaya""jimicsigay tallaabada hadba dhinac u qaadiyo joogsiga

hannaanka leh kolkay jagac ka siisaa waa intaan ku jecelee"".

jawiga saxan ee degan , dhawaaq yarida hareerahayga iyo koobka shaaha ah ee caraf iyo udgoonba leh ee agtayda yaalla markaan laba jeer "fiiq" kasiiyay iyo waxa kulmay ereyga baytka heesta ah "jirrid weynta geedaha xarku siduu u jabiyaa , anigana jacaylkii jidhka ii dhex qaadayoo jeex igama joogee ". waxay maskaxdaydu isweydiisay dadka sidan jacaylku uu u biyo dhigay adigu maxaad kaga duwan tahay? miyaanad cid jecleyn ,misana jeclaan doonin, qofkiise jacaylka laygu soo dhiibay maxay la habsaantay, waaba hadday soo socotee , balse haddii ay mar uun kusoo gaadhi lahayd xawaaraha socodkeedu gaabiyaa ma diin bay soo raacday oo ay gaadiid kasoo dhigatay mise cagaf cagaf tii dowlada hoose ayay dhexda kulasoo
jirtaa ???!!!. naftayda ayaa haddana isu jawaabtay oo maxaad ku fali
jacayl, dadkii uu kaaga horreeyayba wayka cabanayaane,balse sida uuyahay aan dadka la eegee muu mar uun isoo booqdo wuxu, waa

jacaylkee, malaha waxaan ahay qofkii u horeeyay ee jacayl taleefan u diraya oo kuleh waan ku tabayaa waaba haddii taleefan laga waco uu sitee.

Facebook-gaan ku dhex mushaaxayaa oo dad aanu saaxiibbo dhow nahay ayaan kolba u jawaabayaa, balse waxaan awood aanan anigu lahayn ku raadinayaa qof cusub oo aan caawa barto. cajiib !!!! inan magaceedu i qanciyey waanigan is arkay anoo profile keedii sida qotiga dul taagan oo kolba sida xaashida kitaabka u rogaya sawirrada iyo waxyaabaha kale ee ay dadka la wadaagtay. magaca ugu qoran ayaa durba i qanciyey , cod aan igasoo baxayn dhawaaqiisu waaniga hoos u idhi malaha jacaylkii diinka soo saarnayd waddadii aad ku sugaysay waatan dhinaceeda kale kasoo muuqatay ,inyar kadib sidii oo ay isoo gaadhay oo kale ayaabay online soo noqotay.
cajiib!!! farxad aanan garanayn meel ay ka timi ayaaba i saaqday , degenaan iyo debecsanaan saaid ah ayaaba ideeqay isla daqiiqad gudaheed sidii oo qofka aan sugayey oo kale waaniga salaamay ""Asc""  goor aan u qorayba

isma ogayn balse waxaan is ogaaday iyadoo isla markiiba laysoo jawaabay ""Csm"" walaal oo aad mooddo jawaab celin meel i madhnayd oo qalbiga ah isla markiiba ii buuxisay. fursad aan weligay sugayey sidii oo ay tahayoo kale ayaa naftayda si hoose loogu guubaabinayaa in aanay dayicin , woxoogaa yar oo ereyo soodhoweyn ah waa inta aan takhasuska ku ahaye ayaan u qoray ""soo dhowow walaal, soo dhoweyntaada saf baa loogu jiraa" farriin jawaab celin ah oo qosol ah ayaaba laygusoo jawaabay ""kkkkk wll shukran "" farxad geli ayaan islahaa balse hadda dhab ayay noqotayba in ay hoos u qososhay . hees ii baxaysay oo meel ay ku socoto iyo meel ay kasocoto aanan lasocon ayaan ku war helay ereyada baxsan ee dhagahayga soo gaadhaya "jinni iyo insibaa qiree , haddii aan jacayl jirin ifka jowharad nuurtiyo wanaag laguma joogeen".

isbarashada noo bilaabantay ayaa aad ii xiiso gelinaysa , xilliga aan soo galay faceebook gu waxay ahayd 07:30 habeenimo , haatan waxay

goorsheegtu isku taagtay 10:30 habeennimo. aniga iyo iyada waar hadda iyada waa shaqlane , ayaa farriimo qoraal ah kuwada hadlayna isbarasho hordhac ahna u badan. waxa farriin ahaan ay iigu soo qortay ""walaal waa waqti dambe ,aroortana iskuul ayaan aadayaa ee habeen wacan waa inoo mar kale iyo kulan dambe oo xiiso leh waana baxay ee nabadey.
roob mahiigaan aan miiraale oo kale u maleeyay ayaa iga qaaday hebelkii fiidkii aan ahaa hadda ma ihi , waa hebel kale , mayee malaha waa hebel cusub, isma bedelin muuqaal ahaan balse qalbi ahaan ayaan isbedel weyn ka dareemayaa.
farxad aan weligay isoo booqan ayaa haatan ila caweyneysa, dhinacayga ayaan daymooday mise koobkii shaaha ahaa oo aan badh ka cabey ayaa halkiisa ku qaboobay , hurdo ayaan isu diyaariyey qosol iyo rayn rayni weheliso, waxaanan sugayaa goorta ugu dhow ee ay iyadu hada waa iyadiiye online soo noqoto.

Caawa jawigu wuxuu iigu soo galay , xiiso aan xad lahayn haba yaraatee, waana goortii iyo

xilligii aan filayey inay shaqlan online soo noqoto , waxaan si degdeg ah u galay bartii xiisahan i haya iigu sababta ahayd waa facebook ga e waan ku jiraa meel kuma daahine waaniga sida leeb qaanso laga tuuray oo kale u dul tagay degelkii ay ka degenayd guriga bilaa albaabka ah ee cid kasta ay bilaa idanka ku gasho ee facebook , haddana kumanaan ay ku jiraanba, inantii xalay waa shaqlan , waa shaqlan shaglaydhe fariin goorta lasoo diray aan waqtigeedu siiba fogayn ayaaba ii taalla "kumee,kulankii xiisaha lahaa ee aan xalay kulahaa waa inoo kulan dambe oo xiiso leh ayaa waqtigiisii lagaadhay "" cajiib!!!!!!! farxadii markii hore ila joogtay hadda waxa soo labaysay walaasheed , mayee ilma adeeradeed , farxadaas ayaa heerkeedii boqolkiiba boqol tagay mayee hadaan cabiri lahaa anigu boqolkiiba way dhaaftay .
"waykan walaal, qof la waayi karo ma ihi " ayaa intaan is yara xariifiyey sidii inan yar oo xaflad joogta ugu jawaab celiyay.

sheeko aad mooddo inaan durba isla jaanqaadnay ayaa noogu socota si xawli ah oo weliba durdur ay yihiin ereyada macaan ee soo

dhoweynta kalgacalka leh ay dhex dareerayaan badweynta isbarashadayadu . degenaa waxa yari oo hadal debecsanaa erey walba halkiisa ayay dhigaysaa, waxa sida roobka noogu da’aysa sheeko boqola oo xiiso buuran uu weheliyo , waxaan ka cabaynaa xareedda roobka isbarashada , dhadhan wacanaa isfahankuna dhalaalin ogaa, dheemanka na dhex yaalla ayaa waqti yar gudaheed ku iftiimay, ilayska kasoo baxaya sheekada noo socota waxay iftiiminaysaa inta u dhaxaysa labadayada weji , waa wejigayga iyo wajiga shaqlane , hoos baan isu idhi ninka calfada shaqlan adduunka badhaadho ayaa uu uga dhigan yahay , aakhirana kolay wanaageeda duulduulkiisa ayaabu ku janno tagi , waan farxaa oo jeclaadaa in ninkaas aan noqdo , haddana ilaahay ayaa calafka halkuu geliyay og .

dareenka ku ladhan la hadalkeeda oo keliya ayaa waxa aan u waayey erey aan ku cabbiro walow haddii la baadhi lahaana qaamuuska ereyada dareenka laga helo erey lagu sifeeyo laga soo waayi lahaaba, siday usocdeen farriimo qoraal ubadani ayaa waxan

isweydiiyay inanta sidan u wacan sawirka muuqaalkeedu sida uu noqon karo , waan ka codsadayba inay sawirkeeda ii soo dirto haddii ay awoodo si ixtiraam leh?.

dun wacnaanta way u dhalataye, hadal jawaab celin aqbalaadna ah oo malabka la dhadhan ah ayay haye igu tidhi, isla daqiiqad gudaheed waxay ii soo dirtay sawir gebi ahaanba bedelay jewigaan ku jiray , muddo laba daqiiqadood ah ayaa waxa dhinacuu usocday ma ahane dhinac kale u jeestay qulqulka dhiigayga, afar tin oo xaad ah oo aan lahaa ayaa si aan loo dirsan u sare kacay .

naqaskii sankayga aan ka neefsanayey iyo garaacii wadnahayga ayaa labalaab sare ugu kacay , waxa igu soo dhacday hees ahayd"" halbowle siduu i go’ay , haab-haabtay waxaanan hayn hohayeey maxaa i helay"" weel ay casho iigu jirto ayaan lugta ku daadiyey anoon is ogayn , caano jidhkayga ku daatay iyo anoo maryahaygii qoyan yihiin sariirtana dul jiifa is arkay , sibaan noqday , qolkaygii ayaa laygu soo galay anoo aad mooddo in aan

xanuunsanayo , waxaan galay hurdo weligeed aan isoo booqan , shaqlan ayaa maskaxdayda ka guuxaysa , hadda waxaan maqlayaa dhawaaqa shimbiraha , waa waqti subax ama aroor  hore ah waagii ayaana beryay , ninkaygii xalay suuxay saaka waanigan toosay .

Aan isku dayo sawirkii xalay jawigayga bedelay inaan idiin sifeeyo , walow aanan ereyo lagu cabbiro ba u haynin , waa geenyo shaaximan oo heensaheedii u dhan yihiin , qorqornaanta wejiga ,sanka toosan ,indhaha cad cad ee suniyaha qaansada oo kale la moodo ay dul taagan yihiin , dibnaha marka ay dhoollo cadeyso muuqaal cajiib leh bixinaya , wejiga quruxi ku xardhan tahay ee alle dhamaystiray .labbiska oo si habsami iyo xarrago leh ugu hagoogan guud ahaan madaxa , asturnaan awgeedna wejigeeda oo keliya muuqdo waa inan ilaahay haybad quruxi u dhan tahay ku galladay , qacdii indhaha aan saarayba si deg deg ah ayaan dareen naxariis leh oo qabow qalbiga ka dareemay .

Hibo eebbe ayaa bixiyee, haddii in uun haybada quruxda la qiimayn lahaa , kaalinta

koowaad iyada ayaa iska yeelan lahayd.
jawiga noloshu haddii sidan oo kale uu ii ahaan lahaa markasta farxadayda duul duulkeeda oo keliya ayaa waxa ay sida roobka ugu di' i lahayd cid kasta oo aagga aan ku suganahay cagta soo gelisa , jewi ka cimilo fiicani ma jiro marka ay ila joogto weliba si qalbiyan ah iila joogto .

Barashadayada bilicda sani waxay caado nooga dhigtay inaan habeen kasta waqti badan wada qaadano,  balse caawa iima muuqato mana arko .
  waxaan kolba milicsanayaa inay soo gasho degelka qalbiyadayada xidhiidhiya , nasiib darro caawa ma joogto muddo hal saac ah waanigan qolka suuxdinta jiifa , mana hayo dareen sidihii dhaymada u ahaa naftayda caawa cidloonaysa , waa ruux aan tebayo caawa . caku ciil badanaa!!!!!!!!!.
goor aan quus la ildaranahay , waa quus farxad la aan ahe ayaa waxa si kedis ah iigu soo dhacday farriin cod ah oo dahabi ah oo dhegtayda xan xanteysay oo ka timi dhankeeda , inta aanan ereyada codkeedu ka

tarjumayaan ama nuxurka uu xambaarsan yahay dhugan waxaan aad ula dhacay codka dahabiga ah ee ilaahay ku galladay , haddii aan jiifay waan soo sare kacay , haddii aan si u xummadaysnaa hadda waanigan nafisay waxaanan ku diirsaday farriinta ay xambaarsanayd codkeedu , sida cajaladda ayaan kolba dib u dhegeysanayaa codkeeda, haddii farxaddu ay sida iskiriinka oo kale ahaan lahayd hadda keligay ayaa sida carruurta u nuugaya.

## Qaybta 2aad: Codsigii ila cuslaaday.

Keliya , xilligan aan joogo waxa niyadeyda ku weyn sidii aan ula kulmi lahaa shaqlan , waxaan aad ugu dhiirigelinayaa naftayda , weliba gaar ahaan maskaxdayda inay u diyaar garowdo suaal misana codsi aan hordhigi lahaa iyada.
waa suaal waqtigeedii la joogo , kuna habboon in lagu dhaqaaqo fulinteeda .
caawa si aad ah ayaan u xammaasadaysanahay weliba xammaasad dareen leh , sidii caadada noo noqotay waxaan xidhiidhiyey fiillada qalbiyadayada isu haysa ee aanu xidhiidhkayaga ku talantaalinno.

maskaxdayda ayaa hawshii loo diray bilaabaysa waxay si kedis ah bedka usoo dhigtay codsigii abid ay ku hawshootay ""marka hore salaan qalbi kuu debcay ka timi , mar labaad caawa waxaan kuu sidaa codsi inbadan i cusleeyay inaan ku weydiiyo , balse caawa waxaan kusoo dhiiraday naftana kusoo

dirqiyey dareen i gubaya soo bandhigiisa farriintii sahanka u ahayd , aan usoo dego ujeedadayda'e , waxaan kaa codsan lahaa anigoo og inaanad marnaba cudurdaar ka keenayn codsigaygan , waxaan jeclaystay inaan xidhiidhkeenan curdinka ah u bedelno si ka duwan sidii hore balse taas ka hor ay ila fiicnaatay inaan si toos ah isu aragno oo aanu kulanno waxaanan kaa rajaynayaa jawaab celin aqbalaad iyo soo dhoweyn ah , MAHADSANID .""

Farriintan ayaan caawa u diray waxaanan aad uga werwersanahay waxay kaga jawaabi doonto .

sidii arday imtixaankii dugsiga ee shahaadiga ah loo soo dhejinayo ayaan si u kurbaynayaa naxdin misana farxad yari huwan tahay ayaa i hadhaysay waxaanan weli sugayaa falcelinta shaqlan waa shaqlantaydii aan isa siiyee.

cawaday iyo nasiibkaygu halka uu i dhigo ayuunbaan cagaha dhigan doonaa , hadda waxa la gaadhay xilligii aan jawaab celinta codsigaygii heli lahaa nasiib wanaag si deg deg ayay iigu soo jawaab celisay farriin u qornayd sidan :

""marka hore waan kaa qaaday salaanta si kal iyo laab ah mid taasi la dhadhan ah oo u dhigantana hawada ayaan kuu soo marinayaa , waad ku mahdsantay soo gudbinta codsigaaga , rejo inbadan qalbigayga holcinaysay ayaad ila dareentay waan u qaadan kari la ahay qofkii aan xiisaha baaxada weyn leh u hayey inaan si toos ah ula kulmayo , cudurdaar maba iman karo xasuustaydana kuma soo dhici karo , waxkasta oo iga
baajinaya inaan kula kulmo hawada ayaan ka saarayaa misana god ku hubsanayaa , waan kaa aqbalay kuma odhan karo balse waan ku qasbanahay inaan dareenkaaga tixgeliyo sidaa awgeed waxa aynu kawada hadalnaaba waa jaangoynta waqtiga aynu kulmi lahayn iyo goobta aynu ku caweyn lahayn , taasina waa adi dhankaaga qorshaheedana inoo soo dhamystir , anna fulinta iyo garab kaaga oo aan taaganahay iga sug "".
isku toosanaa labada dareen ee codsiga ah iyo qaabilaada looga falceliyay , waan ku ogaa shaqlan inay jawaab noocan ah soo dirayso balse waxaan hadda la tacajab sanahay ereyada ay isticmaalayso , quruxda dabeeciga

ah waxa u raacda ereyo qurxoon oo is daba dhacaya , balse la kulankeedu sida uu noqon karo waa waxa keliya ee aan hadda ku mashquulsanahay , maskaxdaydana isku laba rogaysa .

Caawa si baan u firfircoonahay waxaana gebi ahaanba aan hawshaydii isugu soo koobay kulanka soo socda qorshayntiisa , hadda waxa la iga sugayaa waqtiga aan u sheegi lahaa inaan kulmayno , culayskeeda ayay wadataa marka adiga arrinta gacanta laguu galiyo waxaan maqli jiray maahmaahda tidhaa ""Ama arrin keen ahaw ama aqbal keen "" hadda aniga ayaa arrin keen ah iyaduna waa aqbal keen , taasi waxay dhinac kale iiga sii caddaynaysaa in masuuliyada uu ninku iska leeyahay xaaskiisuna isaga uun ay amarka uga dambaynayso waa tusaale kooban oo dhinac iga tusaysa edaabta ku duugan iyo akhlaaqda qaddarintu muunadaysay .
waxaad i mooddaa nin la yidhi soo diyaari khudbaddii aad berri ka jeedin lahayd xaflad ilyartu isqabatay oo ay kasoo qayb gelayaan

dhamaan madaxda wadamada caalamka , balse xafladaas ayaaba ii fududaan lahayd marka la barbardhigo lakulanka qof aad iigu weyn , waaan kasii fikirayaa erayadii aan odhan lahaa marka ay indho debecsan oo naxariis kalagacal adi laguu qabo kusoo fiirinayaan aad odhan lahayd .
wakhtigu wuxuu is guraba waxaan goaan ku gaadhay in maalinta khamiista ah ee soo aaddan iyo hotel hebel in ay inoo ahaato waa isla qaadanay haye iyo haye ayaana ku kala tagnay , isagoo mid kasta dhinaciisa la xumadoonaya qaabilidda jawiga dhif iyo naadirka ah ee kusoo aaddan khamiista kulanka loo dhan yahay.

Waa galabnimo arbaco ah , arbaco khamiis soo daadihinaysa , khamiis iyana aad mooddo inay xog iyo xamaasad la tabcaan ah , waxaan ku jiraa qolkayga sideg deg ah ayaan u booday waxaan bilaabay hawlgelinta shaqaalihii kulanka khamiista , hawl kasta sideeda ayaa loogu dhaqaaqay , waxaan lugta ku cadaadinayaa leebarka gaadhiga aan wato , labadayda gacmoodna waxay dulsaaran yihiin

shookaanta gaadhiga waxaan hayaa jidka ku toosan carwada dharka lagu iibiyo dhegahaygana codka ahmed zaki ayay la jibaysan yihiin ""adaan koonka kuu jeclahay qalbiga keli baad ku tahay karaamaan kuu hayaayoo korkaad ii saaran tahay "" eryadaas ayaa si dhab ah iiga tarjumaya iga walle been muu sheegine anigay hadda korka ii saaran tahay shaqlantaydii karaamana waan u hayaa .

waxaan hadda soo gaadhay carwadii magaalada ugu dharka bilicsanayd , waxaan iibsaday suudh aad iigu soo baxaya oo dhamaystiran , kabo , okiyaale cad cad iyo agabka kale ee ragu ku labistaan jidkii ayaan haddana dib usoo qaaday , dhankii guriga ayaan dib ugu soo dhaqaaqay hadana soonoqoshadayda iyo waxa is daadahaynaya ereyada heesta "" waa iga dardaarane waan kuu digayaa dabuubtayda qaada oo adoon dookh caashaq qabin kalgacal lama daadahshee "" cabdi hani ma anuu ila hadlayaa moojiye waa kan dardaarmaya oo yuu la dardaarmayaa ma aniga , mayee heesta ayaa sidaas ahe hawlahaaga ku foof yaanu kaa jeedin hawlahaagee , waar cabdi hanow iska

dardaaranoo aniga iyo afaaraha shaqlntayda hasoo gelin anoo leh waanigan gaadhiga kasoo dagay"" .

Caawa waa khamiis , khamiis aan sugi kari la ahay inta uu waagu ka dillaacayo, sidii wiil yaroo dhalaan ah oo berrii ay ciid u tahay ayaan u xiisaynayaa in waagu soo deg dego.
waan jiifaa idhaha ayaan isku hayaa , sawirka ruuxa qalbigayga gilgishay ayaa kolba i hor imanaya , waan iska dhoolo cadeynayaa , dhoolo cadeyn qof aan i ogeyni uu is odhan karo waa dhoolo cadeyn bilaa muraad ah , halka kuwa dhanka qallooca wax ka eegaana ay i odhan lahaayeen wuu qafiifay, ma qafiifine waan qushuucsanahay .
waxaan tirinayaa ilbidhiqsiyada , daqiiqadaha iyo saacadaha waaberiga iga xiga.
Hurdo waa kala carceernaye kolba waan is rogayaa mar dhinaca bidix marna midig marmarka qaarna marka xasuustu ila fogaato ayaan soo fadhiisanayaa , anoon is ogayn ayaan haddana dib jiifka iskaga noqdaa.
ma iga ciyaar ciyaar baa mise waan cadibanahay? suaalahaas ayaa i hor imanaya

balse jawaabteeda waan ka wahsanayaa , dheeraa habeenku waa habeenka keliya ee igala dheeraa waxkasta oo ila dheeraan jiray .
hadda waxaan maqlayaa eedaanka salaada subax , duca qabihii eedaami jiray waa ka ku dhuftay ""allaahu akbar allaahu akbar"".
sidii wiil yar oo arday ah oo fasalka laga sii daayey maalin arabco ah oo jecleysanaya ciyaarta kadib shan maalmood oo uu waxbarasho kusoo jiray waanigan riyaaqay.
sariirta ayaan kasoo booday hadda weyso ayaa i hor taalla waxaanan kusoo tukanayaa masjidka.

Maanta waa khamiistii aan u jibbaysnaa in muddo ah , taleefankayga gariirkiisa ayaan jeebadda bidix ka dareemayaa !!!! waa number aan sida faataxada u xafidsanahay , 82 ayaa u dambeeya , waa shaqlan shaqlantaydii waan qabtay , codkii debecsanaa waanigan dhegta ka maqlaya qalbigana u raaricinaya , waanu kala boganay HOTEL kii hebel ayaynu ku kulmaynaa ee isdiyaari ayaan ku kala tagnay.
Hadda waan labisanahay , labbiskaygii u dambeeyay gaadhiga ayaa iila sii jeeda

dhinaca hotelkii ballanta.
qaddar laba daqiiqo ah ayaan kasoo hormaray waqtigii ballanta , waxaan fadhiyaa mid kamid ah laba kursi oo qurux la liicaya oo hal miis oo maro cas oo bilicsan ubaxyona wehelinayaan uu u dhexeeyo , anoo taleefankayga ku jeeda ayaa waxa halmar hortayda kasoo muuqatay inan labbiska bilicdii iyo quruxdii dunida isku soo fuuqsaday wadata , joogga dhamaystiran , tallaabada heerka sare ah ee ay bidixda ka tallaabsanayso iyo udgoonka iyo carafta igu soo dhowaaaneysa , wejiga soo widh widhaya , indhaha debecsan ee naxariis iyo kalgacal hadheeeyeen ee dhinacayga soo eegaya markaan arkay ayaa la isaaqay!!!!! wallee waa la isaaqay waana suuxi gaadhay. waa shaqlan , shaqlantaydii .
""Horseedka, asluubta , hufnaanta , xishoodka , hidaha dhaqankeena ,haldhaa laga eegto sidii hogol hoortay hilaac ee u eegey runtii way kaa heleen macaan dhaayuhu"" hees.
Haatan waa wada fadhinaa shaqlan, ereyada afkeeda kasoo baxaya ayaan kolba midh ku darsanayaa !!!! indhahayga iyo indhaheeda ayaa si toos ah isugu maqan !!!  jawi isoo mara

waa kii abid iigu saamaynta badnaa si xeel dheerna ii raadeeyay.
waa wada joognaa anagoo si aad ah isugu faraxsan , waan hantiyey qalbigeeda , qalbigaygana iyadaa haysata .
habeenkaas ayaa ahaa habeenkii u horeeyay ee xidhiidhkayaga bog cusub u bilaabay , hadda waxaan ku heshiinay in aan isu ahaano hal iyo nirigteed islamarkaasna aanu si aad ah isaga warqabno , habeen badhaadhe ayuu noo ahaa aniga iyo shaqlan waxaana aanu kala boganay waxkasta oo dhexdayada iman doona si waafi ahna waa isula fahanay sidaas ayaana aan ku kala hoyanay.
caawa waxa xasuus gaar ah igu haya waqtiga dhif iyo naadirka ah ee aan lasoo qaatay qof noloshayda kob barwaaqo ah ku xasiliyay , waxa igu soo noqnoqanaya hadaladii cajiibka ahaa ee qalbigaygu u bogay , marka ay i lahayd "guuleedow ma u malaynaysaa caawa in aanan dareenkayga cabiri karin waxaan u qaadan la ahay in aan caawa fadhiyo qof qayb laxaadle noloshayda ku leh , noloshayda ayaa iska ahayd mid aan qaab iyo qumanaan nafeed haysan , nolol ku dhisan himilo iyo naawilaad

aan xidido adag ku taagnayn , balse si kedis ah waxa ugu soo biiray shaqsiyad dunida sawirkii aan ka haystay si dhab ah iigu bedelay sawir illaa hadda qalbigayga raadeeyay, maalintii aad soo labaysay naftayda kelida ah , maalintii aad soo garaacday albaabka qalbi qufulo adag ku xidhnaayeen, qalbi aan wax xog ah ka haysan in uu jiro dareen jacayl la dhaho oo nolosha marna macaankeeda iyo muunadeeda ku huwiya marna mijoxaabiya oo mayd socda ka dhigaya naf iska itaal darnayd haatanse waxa aan la dhacsanahay oo aan ku niyadqabaa ruuxda loo soo xulay ruuxdayda ee u ah dhamaystiraha qabyada noloshayda , guuleedow ku helay oo ku hantay ee alle haygu kaa hibeeyo oo hoy ha inawada geeyo , oori xalaal ah inaan kuu noqdo waa rejada keliya ee naftayda ku weyn ee adiguna dhinacaaga ila hay oo hayaanka igu kaalmee macaanow xabiibi".

## QAYBTA 3AAD: KAAMA FILANAYN.

waqtigu waa cajiib kolba si ayuu isu rog rogaa ,nolosha cusub ee wehelka leh ayaa si caadi ah usocota balse kuma talogelin shaqlan waxa u iman doona dharaaro isbedel ku keeni xidhiidhkayaga sida habsamida ah ee bilaa turxaanta ah jidkii midowga nolosha u haya.
maalin iiga duwan maalmaha kale , maalin damisay shamicii iftiiminayey xayaatada ruuxdayda, maalin dhif iyo naadir ku noqotay shakhsiyadayda yar ee curdinka ah, naftayda yar ee taagta daran , ruuxdan i sudhan ee la ciirciiraysa bilowga neecawda jacaylka ah ee si aan la dareemayn ugu sii fidaysa tin iyo cidhib meel kasta oo jidhka kamid ah , ha ugu darnaado qalbi holcaya oo ay ku keliyowday hawl adduun iyo ilaalinta xakamaha isu haya labada qalbi ee wadajirka isula laafyoonaya beeraha jacaylka.
waxa aan si dhib la aan ah uga toosay qolkayga hurdada, sariirtayda misana dhiirigeliyaha ay ku xasisho naftaydu , sariirta aan xog kasta oo saamayn leh ku faaqido dusheeda .

waxaan wacay shaqlan , dhegta ayaan

taleefanka ku hayaa , wuu dhacayaa "dhuudh dhuudh dhuudh" weligay sadex jeer oo dhawaaqa dhicista taleefanka oo isxiga dhegtaydu ma maqal marka aan waco si deg deg ah ayey "hello , gacaliye guuleed, guuleedkaygiiyow see tahay xabiibi ma ii nabad qabtaa naftaydiiyeey" iiga hor keeni jirtay balse hadda lagama jawaabayo oo lama qabanayo taleefankeedii, waan ku celcelinayaa kama daalayo , tolow maxaa helay , maxaa qabsaday, maxaa ku dhacay, maxaa soo gaadhay, maxaa haysta , maxaa lasoo gudboonaaday?????? , dhowr iyo toban suaalod oo caynadaas ah ayaa si halhaleel ah maskaxdaydu usoo tabinaysaa , cajiib , cibaaro, ammuur, yaab , afkalaqaad, uqaadan waa , tobaneeyo dareen oo isku sidkan ayaan si toos ah u dhex tagay mawjadaha ay ka dhex rogmanayaan kadib markii si kedis iyo lama filaan ah ay iigu soo jawaabtay fariin qoraaleed ay soo qortay , anoo ku dhaygagsan sawirka shaashada ii saaran ee shaqlan , jewi aanan malayn karina ku jira ayaan isha ku dhuftay weedha u horaysa fariinta ay soo dirtay.

" walaal macaanow waad ogtahay waxa aad

samaysay ee maxaad iisoo garaacaysaa xiligan, aan kaa dhigto xiisadayda fasal baan ku jiraaye , kaama filanayn laakiinse haatan dhacday goaan baan qaatay ee walaal nabadgelyo ismana naqaan hadda kadib ".
ma runbaa ma riyo shaydaan baa , miyaan soo jeedaa, miyaan hurdaa , miyaan dhalalawsanahay, ma dhab baa hadda inaad akhriyayso oo aad indhaha ku hayso ereyo noocaas ah oo ay soo qortay shaqlan ???????.
illaa hadda isma lihi mana aaminsani inaan helo warkan , naxdinta , urugada , yaabka , dawakha , walaaca, walbahaarka, werwerka , filanwaaga, mashquulka misana xasaasiyada ku kiciyay naf habi iska ahayd oo aan xataa ilaa hadda ogayn waxa la leeyahay waad is ogtahay waxa aad samaysay ee maxaad iga soo garaacaysaa? waa suaal aanan weligay jawaabteeda heli doonin hadaan helana aanan fahmi doonin sida ay ku timi, ilaa hadda waxaan isweydiinayaa waxa aan sameeyay ee weliba layidhi waad is ogtahay , horta waa suaale miyaan is ogahay mise isma ogi , shaki badan ayay igu riday ereyadan 13 ka xaraf ka kooban ee naftayda gilgilaysa sida dabaysha

waa 13 kan xaraf ee isdaba yaala 13!!!!!! sadex iyo toban xaraf oo ka bilaabma W kuna dhmaada Y "waad is ogtahay " waxna isma ogin ee maskaxda noo soo faaruqiya xarfona ma tihidine alla ha idin kashifee waad na kadeedeene iska ilaaliya dadow qaar maaha oo waa masiibo ku dhex jirta afka soomaaliga e qofowna ha u ogolaan in ay kasoo xaadiraan meel ereyo ka meeqaam iyo wanaag badani ay joogaan " waad is ogtahay " waa hadalka markasta oo aan soo tooso carabkaygu ku dhawaaqo kuna seexdo anigoo afka ku haya muddo todobaad ah , shaqo , hawl adduun gebi ahaanba waan joojiyay , waxa aan u dhexeeyaa qolkayga iyo suuliga dhawr iyo tobanka mitir ee u dhexeeya , hal waqti ayaan wax afka la geliyo haleelaa oo aan wax cunaa , taasoo aan u adeegsado tamar aan kula dagaal galo 13kii xaraf ee ka bilaabmayey W kuna dhamaanayey Y sababta ay ku dhaceen oo aan ku raadinayo kuna baadhayo xaqiiqadooda .

illaa hadda ma fahmin sida ay wax u socdaan dhowr mar oo dambe ayaan isku dayey inaan waco shaqlan si war dhamaystiran iyo sabab

cad aan uga helo waxa keenay in sidaa aan ukala fogaano , taleefankii qaban wayday jawiguna igu sii xumaa balse waxaan soo qaatay taleefankaygii qaybta fariimaha ayaan toos u galay farahayga aad moodo in ay ka cabsanayaan qoraalka ayaa hadda bilaabaya qoraal fariineed naftayda ayaase garan la waxa ay ka bilaabi lahayd qoraalkaas qayb maskaxdayda ka mid ah oo aan is idhi dhiiranaanta ayay macalimad ku tahay ayaa i leh waad dareensan tahay in aanad wax dambi ah ka galin shaqlan, mar haday sidaas tahayna weydiin cad oo lingaxan u qor yaana lagaa dareemin in aad u jajaban tahay iyada maadaama iyaduna ay hadalo qalafsan oon looga baran ay kuu soo qortay .

qayb aan iyada lafteeda u aqoonsaday soo tabinta hadalada debecsan ee calaacalkuna ku dhex laaqan yahay ayaa iyana doorkeeda kasoo gashay oo ileh ereyo qiiro leh oo naf aan waxba galabsan oo iska daacad ah ka timi qor intaasoo laga yaabaa in ay ku fahanto oo si degan ay jawaab waafi ah kaaga siiso waxa sababay kala fogaanta laba ruux oo xadhig

xariir ahi isu hayey.

hadda fariintii aan qori lahaa waan goaansaday waana aan u diray , waxaan sugayaa laba mid in gef xagayga ahi jiro oo sababi doona in aan sidaa ku waayo naf igu lamaanayd iyo in qalad meel kale ka socda oo uu shaydaan ama cid ehel u ahi oo diradiraale ahi uu hurinayo nacayb xidid adag aan ku taagnayn.
haatan diristii fariintayda waxa kasoo wareegtay muddo sadde caano maal ah wax jawaab ahna haba sheegin , waxa isii damqanaysa boogtii qalbiga ay igaga xardheen ereyadii aan la jeclaysan xagayga ee ahaa "waad is ogtahay waxa aad samaysay " taasoo illaa hadda aan la itaal daranahay dhaawaca ay qalbiga ku keentay .
kol haddii aan ogsoonahay in arrintani ay u baahantahay goaan qaadasho kama dambays iyo rasmi abu rasmi ah waxaan goostay in aan u dhaqaaqo dhinacii ay iga xigtay hoyga ay ku noolayd qofkii aan isa siiyay ee haddana laygu qabsaday waar horta yaa ku siiyay ? iyaba waa suaale ma hayo waqti aan kaga jawaabee, hadda waxa aan hayaa jidkii toos u qabanayey

shaqlan gurigooda , albaabka guriga ganjeelka ah ayaan hadda garaacayaa wax cabsi ah kama qabo in layga furi doono iyo cidda iga furi doonta waxa ay tahay , waan isasoo biimeeyay maanta .
waxa iga furtay inan ay shaqlan walaalo yihiin oo isku kaaya taqaanay kadib waraysi aan badnayn waxa ay ii sheegtay in shaqlan aanay guriga joogin oo hadda ay xanuun u jiifto cusbitaalka.

naxdin weynaa , oo haddana farxad weynaa laakiinse ma waxaan ku farxi xanuunka gacalisadayda aan beryo u taahayey maqnaanshaheeda laakiinse haddana waxa aan iyana meesha ka maqnayn jiritaanka farriintii taleefanka laygu soo diray .
hadda waxa aan wada soconaa salma yar , shaqlan walaasheed , dumaashidayda mustaqbalka waxaana aan ku soconaa cusbitaalka ay jiifto ooridayda mustaqbalka haddii alle igu simo oo shaxda ay dagay irmaantu ku badato.
cusbitaalkii ayaan hadda soo gaadhnay gabadh kalkaaliso ah ayaa ii muuqata iyada oo

sii galaysa qolka sadexaad , waa qolka ay salmo yar iigu sheegtay in shaqlan ay jiifto , waan soo galnay waxa meel aan durugsanayn iiga muuqda wejiga shaqlan oo si qumaati ah dhinacayga usoo eegaya indho debecsan oo naxariisi hadhaysay " guuleed , macaane xagee iga aaday maad i nacday " intaa marka ay tidhi ayay oohin bilawday anaa waan is hayn kari waayey oo ilmo kulul ayaa dhabanada i qoysay . ilmada sida wadajirka ah uga socota laba qof oo isku dareen ah ayaa waxa ay i ilowsiisay farriintii laygusoo diray taleefankayga haba yaraatee imikana wax dhib ah iguma hayso dhab iyo dhalanteed ka ay tahay.

## QAYBTA 4AAD: GUULEEDOW ISOO DOON.

shaqlan hadda cusbitaalkii waan kasoo saaray waana ay caafimaad qabtaa balse ma oga in taleefankeeda laga soo diray hubka noociisa jacaylka gumaada kaaga darane in dhaawac uu isoo gaadhsiiyay ma oga , waan wacay waxaana aan u sheegay in aaan caawa kulmayno weliba aan kala hadlayo arrin ku cusub jacaylkeena , qaddar laba daqiiqo ah ayay aamustay marka aan warkaas u sheegay waxaana cod xabeebsan oo cabsi laga dareemayo ay igu tidhi " haye macaan waan is arkaynaa caawa " .
waxaan hadda fadhiyaa goobtii ay ballantu ahayd wax yar kadibna waa ay isoo gaadhay shaqlan iyada oo tallaabada ay qaadayso aad mooddo in ay dhinac u liicayso "soo fadhiiso macaan hana werwerin " weedhaas ayaan niyada ugu qaboojiyay.
sheeko , kaftan iyo qosol goos goos ah kadib waxa aan gudo galay hadalka guntiisa oo ahyd "shaqlan , xabiibi caawa waxa aan ku weydiinayaa suaal kolay qalbigaaga abaaraysa markaa qalbiga adkee si deganaan ahna iiga jawaab" .

shaqlan waa ay fiigsan tahay mana fahansana waxa dhacaya balse si kedis ah ayaan taleefankaygii gacanta ulasoo baxay, iyadu waa ay i eegaysaa uun wax hadal ah iguma darsanayso , waxaan galay qaybta fariimaha waxaana aan indhaha u saaray farriintii , waxa xigtay sanqadh "dam" mise shaqlan baa dhulka jiifta , haba tusin lahaydaa anigaa waxaas oo dhan u sabab ah dadkii hotelka nagu soo ururay "maxaa ku dhacay inanta"?
"way yara dawakhday walaal ee ila qabo".

muddo laba saacadood ah ayay miyir la' ayd shaqlan sababtana aniga ayaa lahaa inkastoo aanan islahayn illaa halkaasay gaadhi .
hadda sidii hore way yara dhaantaa shaqlan waxaan geeyay gurigoodii balse ma ogi xaalkeedu sida uu noqon doono .

waxay gashay baadhitaan dheer iyo cida ka dambaysay qoraalkaa laga soo diray

farriinteeda , ma ay fadhiisan illaa ay soo heshay ciddii soo qortay , goor galab gaab ah ayay isoo wacday shaqalan iyadoo iga raali gelinaysa in aanay iyada marnaba ka suuroobin qorista farriinta noocaas ah iskadaa soo diristeedee , markaa waxay soo jeedisay in intii cid kale fal noocan ah inagu kala kaxayn lahayd ama ay ina kala dili lahayd in la gaadhay goortii aan midhaha jacaylkeena guran lahayn oo reer dhisan oo degan noqon lahayn.
waa hadal gar ah maadaama ay aad u danaynayso wada jirkeena , isla markaasna ay igu dhiiri gelinayso yagleelida guri aanu anagu gaar u leenahay . waxa aan hadal ugu soo koobay iyadoo rejo wacan iga filanaysa in hadda aanan diyaar u ahayn guur maadaama aan ku jiro sanadki u dambeeyay ee jaamacadda sidaasoo ay tahayna aanay duruuftu ii saamaxayn isla waqtigan aynu ku jirno in aan hawshaas gudo galo balse waan kuu ogahay markasta in aad wanaageena iyo badhaadheheena ka talinayso taasna waan kugu ogaa macaan aniguna waan kula jeclahay wada noolaansheheena oo soo dhowaada ee i dulqaado inta aan is dhaafinayo hawlaha

jaamacadda .

nolosha ayaa sidaas iska ah marka qof aad u hamuum qabto ka ag dhawaantiisa iyo kula rafiiqidda noloshiisa , haddana aanad hayntaada iyo awooda dhaqaaleed kuu saamaxayn dhibteeda iyo dhafooro haynteeda ayay leedahay .

waxa aan ku jiraa sannadkii u dambeeyay ee jaamacadda , waa toddobaadkii u dambeeyay ee aan xagga jaamacadda iyo wadadeedaba aan cagta saaro maadaama toddobaadka soo socda imtixaankii bilaabmayo kadibna hawlihii qalinjabinta aan dhex dawaafayo. shaqlan illaa hadda jawaabtaydii aan siiyay ayaa u cuntami la' , waxa si toos ah maskaxdeeda isu dhaaf dhaafaya suaalo tiro badan oo u badan xidhiidhka a dhex yaalla taasoo ay jeclaysanayso in aanu si wadajir ah midhaha geedka jacaylka aanu gurano ,

anna dhinacayga waxa qalbigayga geed ku yaal ay dabayl saxansaxo wadata ay ruxayso , waa roob mahiigaan ah oo afarta jaho iska soo qabsaday , sidii jiilaal daba dheeraaday oo dadku ay aad u sugayaan roobkaas oo kale

ayaa naftayduna muddo u haraadanayd shaqlan oo ooridayda noqota , marka subixii aad soo toosto ee ay ereyo naxariis leh kugula soo kallahdo "macaane hurdo kugu filan ma seexatay ? soo kac qalbi quraacdii waan kuu diyaariyey, suuliga gal oo biyaha diiran ee aan kuu dhigay kusoo maydho kadib aynu wada quraacano'e " , iyadu may quraacan waqtigan ay ila hadlayso inaan hal weel wax kuwada cunno waa sunnaha qoyskayga cusub , markaan kasoo noqday suuliga ee aan tuwaalkii is mariyay waxa si kedis indhahaygu u qabteen miis balaadhan oo maro cas oo ubaxyo leh lagu qurxiyay guudkiisa , oo quraac aad u macaan oo si fiican loo diyaariyay ay dul taallo , maskaxdayda waxa kusoo dhacday ma boqorkii waddanka xukumayey ayaa la casuumay , haddana waxa aan arkay iyadoo i leh "maya , macaane boqorka naftayda ayaan casuumay, boqorkaasina cid kale maahee waa adiga ", miiska waxa weheliya laba kursi oo iska soo horjeeda , labada kursi mid baa aad u qurxoon oo kii boqorada oo kale la moodaa , waxa aan is idhi kursigaas qurxoon iyadu ha ku fadhiisato maadaama ay qiimo aan la

malaysan karin agtayda ka leedahay balse waa ay iga diiday waxaana ay igu tidhi furaha iyo mashiinka dhaqaajinaya doonta jacaylka ee aanu saaranahay cida haysa ayaan ugu talo galay , guuleedow macaane adigu ku fadhiiso .

cuntada iyada gacanteeda igu siinaysay aniguna si lamid ah ayaan gacantayda ku siinayey , koobka halka aan ka cabbo ayay iyana kaga cabaysay , intaa waxa dheeraa kabbo kasta oo aanu cabno waxa shuruud looga dhigay in hal erey oo macaan oo qalbiga kasoo go'day in la raaciyo "gacaliye ii cab naftaydiiyoow" , " macaan ii cun noloshaydiiyeey".

subaxaas si fiican oo naxariis iyo kalgacal leh ayaanu u wada quraacanay , markii aanu dhamaysanay ayaa ay soo jeedisay in aanu si wada jir ah u ducaysano , waxa ay tidhi marwadaydu " hadda waxa aynu nahay lamaane nolosha ku bahoobay oo is jecel ,laakiinse weli waxbaa inaga dhiman oo aan tabaynaa , ducaduna taas ayay la xidhiidhaa markaa alle aynu ka barinno oo weydiisanno

ubad inagu kaalmeeya hayaanka nolosha " quraacdaas kadibna ducadaas ayaanu kusoo khatinnay alle ha inaga aqbalee .

waxa la gaadhay waqtigii shaqada , labbiskii shaqlan ayaa ii sii diyaarisay , labbis aan aad u jeclaa ayay saaka ii diyaarisay in aan shaqada ku tago , iyada ayaa gacanteeda iigu labbistay , inta ay sujuudda iga dhunkatay ayay tidhi" macaan nabadqab iigu soo laabo , inta aad iga maqan tahay waan sii cidloonayaa" , mahadsanid qaali , alle ayaa igu kaa galladay , adduunka barwaaqo ayaad iiga dhigtay , aakhirana alle xuural cayntaydii jannada alle hayga kaa dhigo , ayaan ku macasalaameeyay shaqadii ayaanan u baxay.

waxa aan ku war helay " waar guuleed ,hooyo hurdada ka kac saaka waa ku raagtee , maad xanuusanaysaa hooyo, waa maxay illaa xiligan aad hurudaa".

waxaan hurdada ka toosay anigoo jeclaysanaya in ay dhab noqoto riyadii macaanayd ee aan ku jiray , in badan baan

sugayey in aan si lamid ah sida riyada laygu tusay aan u arko guusha iyo gaaxda jacaylkayaga aniga iyo shaqlan , balse tani waxa ay dhiiri gelin toos ah iiga dhigtay in aan gudo galo qorshaynta arrintii ay shaqlan ay iga dalbatay oo ahayd in aan si dhamaystiran cagaha ugu taagno qoys ay daadihinayaan lamaane nolosha ku midoobay .

waxaan si kadis ah u soo qabsaday taleefankaygii waxaanan  ku talogalay in aan waco shaqlan anigoo ugu bushaareynaya in aan bilaabayo fulinta arrimaha guurkayaga balse ay ii samirto labada toddobaad ee qalinjabinta jaamacadda ,kadib waxaan galay facebook ga waxaana aan ugu tagay hees ay shaqlan soo dirtay" sidii hogol roob jacayl i helyoo, hurdadii iga jaray habeen ma ladoo, hannaan wacanoo horyaalkii raggoo, naftayda kaa heshoo ma kaa hadhayee, biyo halaclaan

harraad u dhintoo,haddaanan ku helin hog baan geliyoo , habaaskiyo ciidda laygu ham siin".

heestaas waxa ay farriin toos ah u tahay in aan deg deg hawsha u galno , wanaagsanaa oo wacanaa halka ay la rabto inuu gaadho jacaylkayagu , hadda waxa ii caddaatay in si dhab ah ay ugu dadaalayso in aanu sidii hore isaga soo dhowaano oo oori iyo saygeed aanu isu noqono .

weli waxa aan jiifaa sariirtayda dhex taalla afarta gidaar ee si ka duwan sidii hore iila muuqda saaka , waxaan is idhiba way dareen san yihiin hawsha soo korodhay , haddana wuxu naflay ma aha anigoo isugu jawaabay ayuun baan is arkay , marka aad shaqlan guursanayso ma sidan baa la dareemaa, waxaan sawiranayaa anigoo shaqlan reerkoodii ka doontay , adeeraday iyo dhawr oday oo ehelka ahna aan sii wado kuna sii soconno goobtii lagu ballamay , saaxiibkay hanad ayaa si hoose oo kaftan iigu yidhi isagoo i dareensiinaya in uu dheeraaday oo

raagay goortii aanu maqli lahayn damaashaadka iyo dabaal dega arooskiina , waar horta dadka maxaa wada tusay oo indhaha u wada saaray xiliga aan guursanayo balse anoo dareensan in guurku yahay wax aad loo mahadiyay oo diinteenana meel baaxad iyo biyo kama dhimcaan ah kaga jira haddana waxa intaa ii dheer anigoo digtooni iyo taxadar gaar ah ku jira markasta oo hawl cusub oo culayskeeda leh aan wajahayo , waxa aan xasuustaa xiligii waxbarashada dugsiga hoose aanu ku jirnay marka imtixaanka la galayo , subaxa imtixaanka la qaadayo badanka ardaydu marka miiska sidaa loo soo dhigo warqadda imtixaanka in ay ardaydu ku deg degi jireen ka jawaabida suaalaha fudud iyaga oo aan akhrin misana ka bogan tallaabooyinka iyo tilmaamaha la qaadayo ka hor inta aan laga jawaabin suaalaha imtixaanka , si la mid ah sidaas waxay si deg deg ah u dhamayn jireen ka shaqayntiisa iyagoo sidoo kale si deg deg ahna uga soo bixi jireen fasalka , aniguse waa aan ka duwanaa sidaas mana aqaan sababta waxa aan ahaan jiray ardayda ugu dambaysa ee kasoo baxa imtixaanka taasoo suura gelin

jirtay in aad wax badan xasuusato , warbixino dheeraad ah aad hesho oo ay kugu soo dhacaan jawaabo aad hore u la'yd , waxa ay u muuqataa in aan jidkii raacayo oo aan wax badan hubsanayo ha ahaato xiligan aan yagleelayo hoy cusub .

waa maalin arbaca ah xilli markaas uun qadada laga kacay oo aan isu diyaarinayo in aan niyada iyo naftaba yara nasiyo , waxaan si degan oo bilaa werwer ah u dul jiifaa sariirtayda , hooyo ayaa hadda iga baxday iyada oo arrinta jaamacadayda iga xog waraysatay , hooyo waa qofka keliya ee noloshayda heerka ay taagan tahay soo gaadhsiisay .

waxaan maqlayaa dhawaaqa dhicista taleefankayga oo aan iga durugsanayn , waan soo qaaday , waxa indhahaygu qabteen number ay u dambayso 82 waa number ku sawirmay maskaxdayda si deg deg ah ayaan uga qabtay , is waraysi iyo xaalada guud oo aanu is dhaafsanay kadib , waxa aan dareemay in maanta codkeedu bedelan yahay isla

markaana in maanta wax ku soo kordheen shaqlan.

shaqlan oo weli sidan codkeedu u bedalan yahay ima soo wicin, marka ay isoo wacdo si farxad leh ayay ii salaami jirtay, codkeeda debecsan ayaan anna farxad kasii qaadi jiray, balse maanta waxa aad mooddaa in ay xaalad kale ku jirto , ma odhan karo way murugaysan tahay ,mana odhan karo xaalad iska caadi aha ayay ku jirtaa.

waa naf aan aad u bartay , daqiiqada u horaysa ee aan codkeeda maqlo ayaan halkan ka dareemaa guud ahaan sida ay dareemayso.

maanta wax weyn ayaan sidoodii hore ahayn oo u muuqda in xaalad cusub oo hor leh ay soo waajahday shaqlan, anigoo aan weydiinba waxa soo cusboonaaday waxa uu yahay ayay igu tidhi "macaan markasta farxadaada ayaan jeclahay haddii aad awooddo facebook ga soo gal , arrin aan kala baqay in aan afka kaaga sheego ayaan kuu soo qorayaaye ".

" haye , qalbi hadda ayaan soo galayaa "

ayaan ugu jawaabay.

isla markiiba si deg deg ah ayaan usoo galay facebook ga.

waxa aan si toos ah u galay qaybta farriimaha , waxa aan gudaha u galay barta uu iga xigo cinwaanka magaceedu , indhahaygu waxa ay qabteen shaqlan oo "Typing"●■●■●■ ku jirta macnihii wax soo qoraysa , wadnaha ayaa si xawli ah u shaqaynaya , indhaha ayaan kaba jeesanayn waxa ay soo qorayso , qayb maskaxdayda ka mid ah ayaa suaalo tiro badan oodda kasoo qaadaysa , maxay tolow soo waddaa ? ma dhib iyo carqalad baa soo wajahay jacaylkayagii ? .

ma hayo waqti aan kaga jawaabo hadda suaalahaas , waxa aan sugayaa waxa ay noqon doonto farriinta hawada iigu soo jirta waxa noqon donto , badhaadhe mise balaayo , wacnaan mise walaac , hadda ayaa ay ii soo dhacday farriintii ay soo qoraysay shaqlan .

waxay ku bilaabmaysaa sidan :
"Fadlan Guuleedow wada akhri farriinta

macaane".

"Macaane , qalbigaygiiyoow , Guuleedkaygiiyoow , halyeygii naftaydoow , waxa aad ahayd ilayska, nuurka, iftiinka dhadhanka iyo dhamaystirka noloshayda , marnaba ma filanayn in tanoo kale ay ku iman doonto jacaylkeenii muddada soo jiray, waqtiyo badan oo wejiyo kala duwan lehna soo maray , marna ma rumaysnayn maskaxdaydana kuma soo dhicin waxa aad la kulmi doontaa tanoo kale , macaane yaaanan hadalka kugu sii badine , abtigay ayaa qurbaha dhowaan ka yimid , kadib shalay ayuu aabbo iyo hooyo ka codsaday in jaamacad dibada ah la ii diro isla markaasna laygu daro oo anu is guursanno wiilka uu dhalay ee aanu ilma abtiga nahay .

Fadlan iga raalli ahaw haddii farriintani dhaawac kusoo gaadhsiiso , haddii layga kaa kaxaystay oo calafku kaa hiiliyay , anigana uu calafku cidlo iyo nolol bilaa wehel ah , nolol uu guuleed ka maqan yahay , nolol ka madhan jacayl , niyad sami iyo wada jirkii aan in muddo

ku taamayey in aynu cagta saarno, waan ka xumahay in aan garab kugu baneeyay , ma malayn karo sida ay noloshaydu noqon doonto adiga la ' aantaa , waan ka xumahay in aanan helin qofkii aan doortay balse uu nasiibku igu simay qof la ii dooray , jiridii ay ku taagnayd noloshaydu iyo xididadii ruuxdayda ayaa maanta hortayda lagu goynayaa mana awoodo in aan wax ka qabto .

waxa aan la noolaan doonaa , kuna noolaan doonaa xusuusta jacaylka aan kuu hayo iyo weedhahaagii nafta u roonaa , kuma ilaabi doono inta aan noolahay , inta ka hadhsan noloshayda waxa aan la noolaan doona murugada ay igu reebayso in aan kaa tago oo ku cidleeyo , waxa aad ku noolaan doontaa qalbigayga , waxa aad ahayd qofka aan u qorsheeyay noloshayda oo dhan , waxa aad ahayd dhibicdii u horraysay ee waraabisay geed ka baxay qalbigayga , markasta waxa aan tirin jiray ilbidhiqsiyada, daqiiqadaha iyo saacaadaha iga xigay goorta aan noqon doono marwadaada , goorta aan xambaari doono

caruur aad adigu aabo u tahay anna aan hooyo u ahay .

waxa aan ka xumahay , u qaadan la ahay in aan maanta ku macasalaameeyo balse waan ku qasbanhay , ma garanayo wax kale oo aan sameeyo , balse waan ku qasbanahay maanta in aan ku macasalaameeyo , maan filayn in maanta ay iskugu keen damabayn doonto , waxaan kuu rejeynayaa in ilaahay wax khayr leh kula kulansiiyo , fadlan waan ku baryayaa iska kay cafi waqtiga iyo waayaha ayaa ina kala fogeeyay.

"NASIIBKAYGA AYAA XUMAADAY EE NABAD GELYO".

FIIRO GAAR AH : qisada sheekadu aniga iguma socoto balse waa dhacdooyinka ka dhex dhaca bulshada dhexdeeda.